

SHARCIYADA XUQUUQDA XANAANADA GURIGA EE MINNESOTA

(MINNESOTA HOME CARE BILL OF RIGHTS - Somali)

**Qaanuunada Minnesota, Qeeybta 144A.44.
Ineey Istacmaalaan bixiyaasha xanaanada guriga ee
lysinka leh.**

Bayaanka Xuquuqda

Qofkii helo adeega xanaanada guriga wuxuu leeyahay xuquuqahaan:

1. Xaq u leeyahay inuu helo war-bixin qoraal ah ee xaqiisa inta uusan helin xanaaneeyn ama waqtiga bilaawga booqashada qiimeeynta hore inta aan la bilaabin daaweeynta, iyo waxa aad sameeyn kartid hadii xaqaada lagu xad gudbo.
2. Xaq u leeyahay inuu helo xanaano iyo adeegyo ku haboon qorshe casriyeeysan, oo raacsan heer daaweeyn iyo xanaaneeyn la ogolyahay, inuu ka qeeyb qaato abuuridda iyo badalaada qorshaha iyo qiimeeynta xanaanada iyo adeegyada.
3. Xaq u leeyahay in horay loogu sheego inta uusan helin xanaaneynta adeega aan u qabaneeyno, edebta eey keeneeyso xanaanada, inta booqasho lagu ogolyahay, fursadaha kale aad heli kartid, iyo wixii ka imaan karo fursadahaas, ka mid tahayna waxa ka imaan karo diidmada adeegyadaas.
4. Xaq u leeyahay in horay loogu sheego, isbedel kasta ee qorshahaha xanaanada iyo in uu ka qeeyb galo is bedel kasta.

5. Inuu diido xaqa adeega ama xanaanada.
6. Xaqa u leeyahay inuu ogaado, inta uuna helin xanaanada hadii adeegyada uu dhiibayo caymiska caafimaadka, caawinaada caafimaadka, ama barnaamijyo caafimaad kale, qarashka adeegyada uu barnaamijka Medicare dhiibeeyn, iyo qarashka uu shaqsiga uu dhiibi doono.
7. Xaq u leeyahay inuu ogaado, inta uuna helin xanaano hadii adeegyada eey leeyihiin caymiska caafimaadka, caawinaada daaweeynta, ama barnaamijyo kale ee caafimaadka, qarashka adeega uu caymiska Medicare dhiibeeyn, iyo qarashka shaqsiga laga yaabo inuu dhiibo.
8. Xaq u leeyahay inuu ogaado wixii qarash ah oo ku saabsan adeega, qof cidii doontaba biilka ha bixiso.
9. Xaq u leeyahay inuu ogaado ineey jiraan adeegyo kale uu ka heli karo jaaliyadda, ka mid yihiin adeegyo kale ee xanaanada guriga iyo bixiyaasha, iyo inuu ogaado meesha uu u aadi karo akhbaarta adeegyadaan.
10. Xaq u leeyahay inuu doorto bixiyaasha uu heli karo uuna bedeli karo bixiyaha marka uu adeega bilaawdo, inta uu caymiska caafimaadka u ogol yahay, caawinaada caafimaadka, ama barnaamijyo kale ee caafimaad.
11. Xaq u leeyahay in akhbaartiisa shaqsiyeed, dhaqaaleed, iyo caafimadeed qarsoodi ahaadaan, oo lagala taliyo shuruudaha

bixiyaha iyo habkiisa ku saabsan sideeynta akhbaarahaas oo kale.

12. Xaq u leeyahay in uu helo dinwaanada iyo akhbaarta laga soo qoray dinwaanka sida lagu xigtay qeeybta 144.355.
13. Xaq u leeyahay in eey u adeegaan dad si fiican loo tababaray oona qaban karo shaqadooda.
14. Xaq u leeyahay in loola dhaqmo si edboon oo ixtiraam leh, oo bukaan socodka xoolihiisa si ixtiraam leh loo hibeeyaa.
15. Xaq u leeyahay in uu xor ka ahaado xad-gudubka jirka iyo hadalka.
16. Xaq u leeyahay si macquul ah, ogeysiis hore ee is bedelka adeega iyo ujrada.
17. Xaq u leeyahay bedel isku-duwan marka eey jirto bedelidda bixiyaha adeega.
18. Xaq u leeyahay inuu ka cawdo wixii ku saabsan daaweeynta ama xanaaneeynta ah, ama noqon weeyso, lagu qaban waayo, ama ku saabsan edeb la'aan ama ixtiraam bukaan socodka ama bukaan socodka xoolihiisa.
19. Xaq u leeyahay inuu ogaado sida loola xiriiro shaqsiga la xiriira bixiyaha oo ka mas'uul ah inuu xaleeyo dhibaataada, isla markaasna bixiyaha inuu baaro oow isku dayo inuu xalliyo cabashada ama dacwada.

20. Xaq u leeyahay inuu ogaado magaca iyo cinwaaka gobolka ama wakaaladda degmada uu kala xiriiri karo akhbaar dheerad ama caawinaad.
21. Xaq u leeyahay inuu muujiyo xaqaan shaqsiyeed, ama eey istacmaalaan bukaan socodka reerkiisa ama ilaaliyaha marka bukaan socodka lagu xukumo inuu wax qaban karin, ayadoona laga aarsaneeyn.

**XUQUUQYADAAN WAXAA LOO SAMEEYAY
MANAAFACA SHAQSIYADA HELAYO XANAANADA
GURIGA**

**HADAAD DACWO KA QABTID WAKAALADDA AMA QOFKA KU
SIINAYEY ADEEGA XANAANADA GURIGA, WAXAAD SOO
WACI KARTAA, U QORI KARTAA AMA SOO BOOQAN KARTAA
XAFIISKA DACWOYINKA XARUNTA CAAFIMAADKA,
WAAXDA CAAFIMAADKA MINNESOTA. WAXAAD KALOO LA
XIRIIRI KARTAA QOFKA SHAQADA KU LEH DADKA
WAAWEEYN EE MINNESOTA.**

Minnesota Department of Health
Office of Health Facility Complaints
P.O. Box 64970
St. Paul, Minnesota 55164-0970

Telephone:
1-800-369-7994 or
(651) 215-8702

Ombudsman for Older Minnesotans
Metro Square Building
121 East Seventh Place
Suite 410
St. Paul, MN 55101

Telephone:
(651) 296-0382 or
1-800-657-3591

**Hadaad u baahan tahay akhbaar turjumaadaan, la xiriir
Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (651) 215-8700.**

**Magaca leysinka
leh:** _____

Cinwaanka: _____

**Magaca / Darajada Qofka Dhibaatooyinka ama Dacwooyinka
Loo Jeedin karo:**

(Saxiixa macmiilka ama Qofka Mas'uulka ah) (Taariikhda)
